

# Waa maxay WIDA ACCESS?

WIDA ACCESS waa imtixaan ka caawiya macallimiinta in ay aqoonsadaan haddii ardayda fasallada K-12 ay yihiin Bartayaasha afka Ingiriska ah. Ardayga baranaya af Ingiriis waa arday si rasmi ah loo aqoonsaday inuu u baahan yahay taageero luqadeed si uu si guul leh ugu fahmo una la jaanqaado maaddooyinka waxbarasho ee ku baxa af Ingiriisiga.

WIDA ACCESS waxay cabbirtaa xirfadaha af Ingiriisiga ee ardayda ee ku saabsan Dhageysiga, Akhriska, Hadalka, iyo Qorista.

## Maxaa looga qaadayaa ilmahaaga imtixaanka WIDA ACCESS?

Ilmahaaga waxaa loo aqoonsaday inuu yahay arday Baranaya af Ingiriiska. Ardayda baranaya af Ingiriis waxay sanad walba galaan imtixaan lagu cabbiro heerka xirfadooda luqadda Ingiriisiga Sida WIDA ACCESS. Macallimiintu waxay natiijooyinka WIDA ACCESS u adeegsadaan sidii hab ka mid ah hubinta horumarka ilmahaaga ee xirfadda luqadda Ingiriisiga.

## Sidee ayaa loo adeegsadaa dhibcaha imtixaanka WIDA ACCESS?

Imtixaanadu waxay ka caawiyaan macallimiinta inay fahmaan haddii ardaydu leeyihiin xirfadaha luqadeed ee ay ugu baahan yihiin si buuxda uga qaybgalka fasalka. Shaqada dugsiga ee ubadkaaga, macallimiintu waxay isticmaalaan buundooyinka imtixaanka WIDA ACCESS si ay u go'aamiyaan sida ugu wanaagsan ee wax loo baro ilmahaaga.

Dhibcaha imtixaanka waxay sidoo kale macallimiinta ka caawinayaan inay la socdaan horumarka ilmahaaga ee barashada Ingiriisiga tacliimeed, isla markaana waxay dugsiyada ka caawiyaan Go'aaminta noocyada adeegyada taageerada luqadda Ingiriisiga ee la siinayo. Waxaad u adeegsan kartaa macluumaadka imtixaanka si aad ugu doodo ilmahaaga dugsiga.

## Xirfadda Luqadda Ingiriisiga

Heerka xirfadda luqadda Ingiriisiga waa cabbir muujinaya halka ay ardaydu ka marayaan geeddi-socodka horumarinta xirfadaha af Ingiriisiga ee ay ugu baahan yihiin si ay u fahmaan oo uga qayb qaataan casharrada ku baxa af Ingiriiska. Marka ardaydu gaadhaan heerarka ugu sarreeya ee aqoonta luqadda Ingiriisiga, uma baahna adeegyo taageero luqadeed si ay uga qaybqaataan barashada nuxurka ee Ingiriisiga ah.



## U Diyaargarowga WIDA ACCESS

- Ilmahaagu uma baahna inuu u diyaargarooobo imtixaanka WIDA ACCESS. Imtixaanku waa fursad ay ardaydu ku muujin karaan dhammaan siyaabaha ay u fahmaan uguna hadli karaan af Ingiriis.
- Ka hel tusaalooyin su'aalo ah oo la xiriira imtixaanka WIDA ACCESS, kuwaasoo ku jira bogga ACCESS Sample Items, <http://wida.wisc.edu/assess/access/preparing-students/practice>
- U diyaari ilmahaaga maalinta imtixaanka adigoo hubinaaya in ay helaan waqti haboon ay ku nastaan iyo inay soo cunaan quraac.
- Kala hadal macallimiinta ilmahaaga goorta aad heli doonto natiijada buundnatiijada imtixaanka, sida iskuulka ilmahaaga u adeegsado buundooyinkaas, iyo sida qoyskaagu uga taageeri karo horumarinta luqadda ilmahaaga guriga dhexdiisa.

## Su'aalaha Aad Weydiin Karto Macallimiinta Ilmahaaga

- Goorma ayuu sameenayaa ilmahaaga imtixaanka WIDA ACCESS?
- Goorma ayaan helayaa buundooyinkayga ilmahaaga ee imtixaanka WIDA ACCESS?
- Sidee ayaa loo diiwaangelin doonaa loona daba-gali doonaa yoolalka horumarinta luqadda Ingiriisiga ee ilmahaaga?
- Sidee ayaa natiijada imtixaanka loogu adeegsan doonaa in lagu taageero horumarinta luqadda Ingiriisiga ee ilmahaaga?
- Sidee ayaa loo go'aamiyaa goorta ilmahaagu joojinayo helitaanka adeegyada luqadda Ingiriisiga?

